


Ammaanka Kursiga Baabuurka

Ameerika oo dhan, waxaa ka jira sharciyo u baahan kursi baabuur oo loo isticmaalo carruurta. Xaqiiji in aad taqaanno sharciga



kursiga baabuurka ee gobol kasta ee laga yaabo in aad u safarto. Gobollo badan ayaa u baahan in carruurta ay ku jiraan kursiyo habboon ee baabuur ilaa 8

sanadood ama ilaa uu dhererkoodu ka gaarayo 4 fiit, 9 inji (145 cm). Suumanka kursiga baabuurka waxaa loogu talagalay dadka waaweyn mana ilaalin karaan ilmo yar. Burburka baabuurta waa sababta ugu weyn ee dhaawaca daran iyo dhimashada carruurta. Si sax ah u isticmaalidda kursi baabuur waxay badbaadin kartaa noloshu ilmaha ama waxay ka hortagi kartaa dhaawac aad u daran.


Xeerarka Ammaanka Kursiga Baabuurta

Xaggeen ku xidhaa kursiga baabuurka?

- Kursiga danbe ayaa ah meesha ugu ammaansan carruurta ka yar 12 sanadood in ay fuulaan.

- Marna ilmo ha fadhiisin kursi hore ee baabuurka yar ama taraagga leh kiish hawo rakaab.

- Haddii uu ilmo weyn yahay oo isticmaali karo suunka kursiga dadka waaweyn ayna tahay in uu kursi hore fadhiisto, ilmaha si sax ah ugu sug suunka dhabta iyo garabka ka dibna kursi gadaal uga **dhaqaaji** muraayadda hore intaad awooddo.



Ilmahaygu meesha saxda ah ma u jeedaa?

- Ilmaha dhashay ilaa ay ka gaaraan 1 sano jir iyo 20 rodol (pounds) (9 Kg) waa in la saaraa kursi ilmood baabuur oo gadaal u sii jeeda.

- Carruurta ka weyn 1 sano jir una dhexeeya 20 iyo 40 rodol (pounds) (9 Kg iyo 18 Kg) waxaa la

saari karaa kursi baabuur ilmood oo **dhinaca hore u soo jeeda**.

- Carruurta u dhexeeya 40 iyo 80 rodol (pounds) (18 Kg iyo 36 Kg), badanaa 4 ilaa 8 sanadood jiryadu, waxay fuuli karaan **kursiga caawinta**, kaasoo suumanka dhabta iyo garabka ka yeela mid u qabsada si sax ah.

- Carruurta badankooda ay da'doodu ka weyn 8 sanadood ama dhererkoodu yahay 4 fiit, 9 inji (145 cm) waxaa si sax ah u le'eekaan kara suunka kursi ee **dhabta iyo garabka**.

Fikradaha ku saabsan Ammaanka Kursiga Baabuurka

- Ma ahan in kuraasta baabuurta oo dhan ay le'egyihin baabuurta oo dhan. Marka si sax ah loo rakibo, kursi baabuurku waa in uusan wax ka badan hal inji dhinac ilaa dhinaca kale u dhaqaaqin.

- Imow hubinta ammaanka kursiga baabuurka ee ka dhacaysa bulshadaada.

Kuwaan waxaa laga yaabaa in ay ku deeqdo waaxda caafimaadka deegaankaagu.

- Xarkaha dhuujinta si ammaan ah u xir isla markaana isha suunku galo ku adkee meel la siman xagasha. Xarkaha dhuujintu waa in ay ku joogaan meel la siman ama ka hooseysa garabka.

- Marka aad isticmaaleyso kursi ilmaha dhashay ee **dhinaca danbe u jeeda**, kursi gadaal u tiiri si aad madaxa ilmaha uga ilaaliso in uu horey u soo dhaco. Gacanta haysa kursi baabuurka ilmaha hoos u dhig.

- Tuwaal la duubay ama buste la duubay ayaa laga gelin karaa dhinacyada ilmaha si ay taageero dheeraad ah u siiso. **Marna** wax ha u dhigin kursi hoostiisa ama gadaashiisa.

- Ilmaha waa in uusan qabin jaakad culus oo uga hooseysa xarkaha dhuujinta. Haddii diirimaad dheeraad ah loo baahdo, isticmaal buste kursi aad kula daboosho.



Text adapted from materials produced in 2006 by Health Information Translations (www.healthinfotranslations.com), a partnership of The Ohio State University Medical Center, Mount Carmel Health and OhioHealth, Columbus, Ohio. This work is licensed under the Creative Commons Attribution-NonCommercial-NoDerivs License <http://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/2.5/>

A Healthy Roads Media project

www.healthyroadsmedia.org

Car Seat Safety – Somali (Last reviewed 5/2010)